North West London Collaboration of Clinical Commissioning Groups

Wadaagida warbixintaada lagu hormarinayo daryeelka

Wuqooyiga Galbeed London xirdfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka waxay si wadajir ah uga shaqeynayaan in ay ku siiyaan daryeelkaaga. Kuwa ku shaqo leh waxay arki karaan warbixinta lamidka ah ee adiga kugu saabsan, si markaas aad u heshid daryeel la isku daray ee mara hay'ado badan. Tani waxay hubineysaa in marka aad soo booqatid dhaqanka Dhaqtarkaaga Guud, isbitaalka, ama aad taageero ka heshid bulshadaada ama guriga, xirfadlayaasha daryeelka sida Dhaqtarkaaga Guud, dhaqaatiirta isbitaalka, kalkaalisada degmada ama shaqaalaha bulshada waxay hayaan warbixinta saxda ah ee adiga kugu saabsan waqtiga saxda ah.

Sidee ayaa midaan loo sameynayaa?

Sida qeyb ka ah ku soo biirka North West London ee daryeelka barnaamijka caafimaadka la mideeyay iyo hay'adaha daryeelka bulshada waxay wadaagayaan warbixin quseyso ee ku saabsan daryeelkaaga si ay kuu siiso daryeel wanaagsan.

Waa maxay diiwaanka daryeelka mideysan?

Diiwaanka daryeelka mideysan wuu ka fogyahay in uu si wadajir ah isugu keeno midkood si wada jir ah warbixinta daryeelka bulshada iyo caafimaadka. Warbixinta waxay ku xirnaaneysaa in ay aasaasto Diiwaanka Daryeelka Mideysan oo bukaanada ah.

Suurtogal ayay unoqoneysaa in daryeelka caafimaadka iyo taariiqda daryeelka bulshada ee ay heli karaan xirfadlayaasha daryeelka ee si toos ah ugu shaqo leh daryeelkaaga. Tani

waxay la mid tahay ogolaanshahaaga, shaqaalaha ku lug leh daaweyntaada waxaa usuurtogaleyso in ay arkaan daawooyinka Dhaqtarkaaga Guud uu kuu qoray, ama haddii aad heshay booqashooyinka hadeer ee isbitaalka.

Haddii aadan rabin in aad yeelato Diiwaan Caafimaad Mideysan ee adiga laguu abuuray, waxaad u baahaneysaa in aad Ogeysiiso Dhaqtarkaaga Guud.

Warbixinta la wadaagayo?

Warbixinta la wadaagay ee adiga kugu saabsan waxaa ku jira:

- Caafimaadka iyo warbixinta fayo qabka ee la xiriiro daryeelkaaga.
- Lambarka NHS.
- Da'da.
- Sharaxaada xiriirka.
- Qaraabada ku xigto.
- Daawooyinka iyo alaarjiga.
- Balamaha, daaweynta iyo daryeelka.
- Warbixinta bulshada ama maskaxda ee quseyso daryeelkaaga.
- Natiijooyinka baaritaanada sida baaritaanka dhiiga, sheeybaarada, Raajada.
- Diiwaanada isbitaalka iyo Dhaqtarka Guud.

Sidee ayaan ugu faa'idaya lahaanshaha diiwaan daryeel mideysan iyo wadaagista warbixinteyda?

Iyo Diiwaanka Daryeelka Mideysan Dhaqtarka Guud, isbitaalada, dhaqaatiirta, adeegyada bulshada, daryeelka bulsghada iyo bixiyayaasha caafimaadka maskaxda waxaa usuurtogaleyso in ay si aad u dhow u wadashaqeeyaan.

Xirfadlayaasha ku daaweynayo waxay si dhow u arkayaan sawirka dhameystiran ee daryeelkaaga. Tani waxay hubineysaa:

- Waxaa kaliya oo aad u baahantahay in aad sheegtid taariiqdaada hal jeer.
- Iska ilaali balamo aan muhiim aheyn iyo imtixaamada.

• Waxaad waxbadan ka qeybqaadan kartaa go'aamada ku saabsan daryeelkaaga.

Xogta gaarka ah ee sareyso miyaa la aruurinayaa?

Ma aruurineyno wax warbixin ah ee sharci ahaan lagu qeexay sida "xasaasi". Tani waxaa ku jira warbixinta ka soo xaaqa, kufsiga, bedelida jinsiga iyo galmada dadkaadan geynin.

Haddii aad ka walaacsantahay wax ku saabsan in aadan rabin wadaagtida, la hadal Dhaqtarkaaga Guud.

Kaas oo arkayo warbixinta aniga igu saabsan?

• Xirfadlayaasha caafimaadka iyo bulshada sida Dhaqaatiirta Guud, dhaqaatiirta isbitaalka, kalkaalisooyinka iyo shaqaalaha bulshada si toos ah ula xiriiro daryeelkaaga.

• Shaqaalaha taageerada ee diyaarinayo balamahaaga ama daaweyntaada.

• Iyo ogolaanshahaaga, kooxyada daryeelka bulshada ee kawada hadlaya cudurka, daaweynta iyo daryeelka ee dacwada shirarka.

Miyaa lala wadaagayaa Diiwaangeyga Daryeelka Mideysan badroonigeyga?

Maya. Diiwaanka Daryeelkaaga Mideysan waxaa kaliya oo lala wadaagayaa kuwa ku lug leh daryeelkaaga.

Xeerka Illaalada Xogta waxay tiri in hay'adaha oo dhan ay hubiyaan in aysan siideynin warbixinta sababeyso waxyeelo halis ah ama ciriiriga shaqsiga. Dhammaan hay'adaha daryeelka ee ku lugleh daryeelka la isku daray ee North West London waxay hubinayaan in ay eegtay warbixinta oo dhan ka hor inta aan laga siideynin in ay u hogaansanaato sharciga.

Sidee ayaad u hubin kartaa in xogteyda aysan ku dhaceynin gacmaha qaldan?

Waxaan leenahay dhoor muhiimado ilaalada amniga ah ee meeleysan si loo joojiyo in warbixintaada si sharci daro ah loo helo.

- Gelida Diiwaanka Daryeelka Mideysan waxaa si toos ah u xakameysay "Waajibaadka Ku saleysan Helida". Tani waxay la mid tahay xirfadlaha caafimaadka iyo daryeelka kaliya ee ku lug leh daryeelkaaga ayaa helaya diiwaanadaada, iyo ogolaanshahaaga. Warbixinta usuurtogaleyso in ay arkaan waxay xadeyneysaa waxa looga baahanyahay in ay sameyso shaqadooda. Tusaale ahaan, daryeelaha shaqaalaha uma suurtogaleyso in uu aqriyo

qoraaladaada caafimaad sida aysan jirin baahi sidaas ay ku sameynayaan si aad u siisid daryeelkaaga.

- Keydka xogteena, halka warbixintaada lagu keydinayo, waxay martaa dhammaan tilmaamaha heerka amniga qaranka. Nidaamka sidoo kale waxaa loo dhisay tilmaamaha hanti dhowrida ee ku hayo helitaanka gelida xogtaada, si markaas hay'adaha daryeelka ay u hubiyaan in aysan jirin qof u heli karo diiwaankaaga si aan ku habooneyn.

Waxaad xukuntaa waxa heli karo Diiwaankaaga Daryeelka Mideysan. Waxaad dooran kartaa qofka arkayo iyo qofka aan arki karin warbixintaada.

Ma joojin karaa dadka qaarkii ee Eegayo Diiwaanka Daryeelka Mideysan?

Haa, haddii aadan rabin adeegyo gaar ah ama shaqsiyaad usuurtogalineyso in ay arkaan diiwaanka daryeelka mideysan, si sahlan ayaad u diidi kartaa ogolaanshaha lagu eegayo marka ay ku siinayaan daryeelkaaga.

Xirfadlayaasha daryeelka waxaa loo tababaray in ay weydiiyaan ogolaanshahaaga ka hor eegida Diiwaanka Daryeelka Mideysan si markaas aad u heshid fursada lagu go'aansanayo haddii aad ogolaatay ama aadan ogolaanin.

Shirkadaha gaarka ee bixiya daryeelka bulshada miyay heli karaan xogteyda?

Waxaad dooran kartaa haddii qeybaha Diiwaankaaga Daryeelka Mideysan lala wadaago shirkadaha gaarka ah ama wakiilada qandaraaska lagula galay in ay daryeel ku siiyaan.

Nooca warbiixnta ee shirkada iyo shaqaalaha usuurtogalineyso in ay arkaan waxay ku xadidnaaneysaa waxa ay u baahanyihiin in ay kugu siiyaan adeega daryeelka.

Warbixintaada lalama wadaagayo ama looma iibinayo ujeedo ganacsi ahaan.

Sidee ayaa warbixinteyda loo ilaaliyaa?

Warbixintaada waxaa loo ilaaliyaa sida waafaqsan Xeerka Ilaalada Xogta 1998, taas oo la micna ah warbixintaada gaarka ah waxaa loo isticmaalayaa in lagu taageero daryeelkaaga. Lalama wadaagayo, ama laga iibinayo, qofkale.

Sidee ayay tani ula mid tahay Care.Data?

Care.data barnaamij qaran iyo wuxuu ka duwanyahay barnaamijka Diiwaanada Daryeelka Mideysan North West London. Warbixinta lala wadaagay North West London sida qeyb ka ah isku darka daryeelka mideysan iyo Diiwaanka Daryeelka Mideysan waxay gaar u tahay

isticmaalka deegaanka iyo looma isticmaalayo sida qeyb ka ah barnaamijka qaranka.

Dadaalada kale ee NHS ee laga yaabo in aad maqashay

Dulmarka Diiwaanka Daryeelka waa diiwaan koronto ah ee wata warbixinta ku saabsan bukaanka oo ay ku jiraan alaarjiga, daawooyinka iyo falalka xun. Waxaa laga soo bixiyay nidaamka Dhaqtarka Guud kaas oo ay u arki karaan xirfadlayaasha caafimaadka ee ku shaqo leh daryeelka bukaanka.

Dulmarka Diiwaanka Daryeelka waa barnaamij qaran oo dhammaan bukaanada ka diiwaangashan Dhaqtar Guud.

Waad ka bixin kartaa barnaamijkaan xili walba, iyo sida Diiwaanka Daryeelka Mideysan, waxaa lagu weydiinayaa ogolaanshahaaga xili walba ee xirfadlaha daryeelkaaga uu rabo in uu helo warbiixntaan. Helida warbixinta Dulmarka Diiwaanka daryeelkaaga waa kaliya baahida lagu ogaanayo aasaaska. Ku keydinta warbixinta hal meel waxay u fududeysaa shaqaalaha daryeelka caafimaadka si ay u daaweyso bukaanada degdega ku jiro, ama goortii dhaqanka Dhaqtarkooda Guud la xiro.

Goorma iyo sidee ayaan u siiyaa ogolaanshaheyga

Ogolaanshaha waxaa lagu bixiyaa barta daryeelka. Xirfadlayaasha daryeelka ee ku jira kooxyada oo ay ku jiraan xirfadlayaal daryeel kala duwan sida kalkaalisayaasha sare, lataliyaha dhaqaatiirta, dhaqaatiirta waayeelka, dhaqaatiirta carruurta iyo dhaqaatiirta maskaxda si ay ula shaqeeyaan dhinaca kalkaalisada bulshada, daaweeyaha, farmashiistaha, cilmi nafsiga, shaqaalaha bulshada, iyo shaqaalaha kale. ma suurtogaleyso in la helo diiwanadaada ilaa ogolaanshahaaga tooska ah la siiyo ilaa ay degdeg ka jirto.

Ma heli karaa Diiwaanka Daryeelkeyga Mideysan?

Waxaa naga go'an in aan u fududeyno bukaanada dib u eegida Diiwaanka Daryeelkooda Mideysan iyo waxaan la shaqeyneynaa jaalalkeena ee North West London oo dhan si loo hormariyo websayd kuu suurtogalinayo in aad gashid iyo aqrisid warbixinta. Shaqadaan waxay dhacdaa inta lagu jiro 2016.

Sidee ayaad u taageereysaa dadka qaba curyaannimada barashada si loo sameeyo dooq la ogeysiiyay ee ku saabsan wadaagista warbixintooda?

Daryeel bixiyayaasha caawinaya dadka qaba dhibaatooyinka barashada waxay mar hore lahaanayaan xeerarka hay'ada iyo nidaamyada la meeleeyay si loo hubiyo in ogolaasho

walba si sharci ah loo helay, iyo in diiwaanka bukaanka lagu gali karo si sharci ah sida waafaqsan Xeerka Illaalada Xogta 1998.

Sharuudaha caadiga ah ee qaadashada go'aanka ee matalaada qof an laheyn kartida way quseyneysaa.

Miyaa layga rabaa in aan lahaado Diiwaanka Daryeelka Mideysan iyo wadaago warbixinteyda?

Adiga ayaa xukumo. Waad dooran kartaa in aad 'ka baxdid' taasi waxaan ka wadnaa in aad dooran kartid in aadan lahaanin Diiwaanka Daryeelka Mideysan iyo wadaagtid warbixintaada

Haddii aad guud ahaan ugu faraxsantahay in aad wadaagtid warbixintaada, waxaad ogolaaneysaa sida xigta:

- Warbixinta adiga kugu saabsan waxaa lala wadaagaa caafimaadka iyo daryeelka xirfadlayaasha bixinaya daryeelka.
- Warbixinta (iyada oo aan la jirin sharaxaadaada gaarka ah) waxaa loola wadaagay si qarsoodi ah hay'adaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada si loo qorsheeyo adeegyada deegaanka iyo daryeelka wanaajinta qofwalba.
- Xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada waxaa kaliya oo ay arki karaan warbixintaada marka ay ku siinayaan daryeel toos ah.
- Warbixinta adiga kugu saabsan LAGAMA iibinayo hay'adaha gaarka ah.
- Xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka waa in ay u xajiyaan diiwanadaada si ilaalsan.

Waad bedeli kartaa maskaxdaada ama 'ka bixi kartaa' xili walba si aad u joojisid kuwa kale ee arkayo warbixintaada. Haddii aad rabtid in aad sidaan sameysid, fadlan u sheeg hay'ada caafimaadka ama daryelka ee adigga ku siiso daryeelka.

Waxyaabaha la tixgelinayo

Hamiladeena waa siinta bukaanada kartida ay kula wadaagaan iyo ku xakameeyaan helida diiwaanadooda. Wadaagista warbixintaada waxaa jiro qaar kamid ah sheeyada aan tixgelino:

• Ma ahan in aad la wadaagtid dhammaan diiwanaada; waad xadeyn kartaa waxa la arkayo iyo qofka arkayo.

• Haddii aad siiso helida diiwaanadaada saaxibada ama qoyska, weli waxaad heleysaa dooqa aadku xadeyneysid waxa ay arkayaan.

• Haddii aad la kulantid qalad diiwaankaaga ah, fadlan la xiriir bixiyaha daryeelkaaga sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogalka ah

Daryeelka taageerayo iyo hormarinayo

Warbixinta qaar iyada oo aan la jirin sharaxaadaada gaarka ah waxaa laga yaabaa in si amni ah lagula wadaago hay'adaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada si loo qorsheeyo iyo lagu hormariyo adeegyada bulshada dadka Wuqooyiga Galbeed ee London. Warbixintaan qarsoodiga waxay ku caawisaa qorsheynta iyo waxay bixisaa daryeel. Waxay sidoo kale nagu caawisaa in aan kormeerno tayada adeegyada la bixiyay.

Ma rabtaa in aad ogaatid wax badan?

Haddii aad rabtid warbixin badan fadlan:

• La hadal xirfadlaha caafimaadka ama daryeelka ku siiyo adiga.

• i-meelka: share4care@nhs.net

• booqo: www.integration.healthiernorthwestlondon.nhs.uk